**#milkiilayaasha Holiwuudka**(Holliwood) & Qalinleeyda mareekanka qilaafkooda ma maqasheen ?.

--------------

mudaaharaadka kasocdo Holiwuudka .

maxeey ka cabanayaan qorayaasha?.

(CHAT,GPT) Jaatjiibiitii, ayaa soo farabaxsanrabo, waxuu leeyahay (AI) anigaba qoraa baan ahay .

waad aragteen (AI) isagoo weriye ah warna ka aqrinaayo TV carbeed.

-------------------------------------------------------------------------

[Nedka ka baar waxa oow yahay (AI) sidoo kale (CHAT,GPT)]

-------------------------------------

# maxaa leesku heestaa bal inoosheeg?

USA waxaa caanka ah , ganacsi walba shirkado gaar ah ayeey u xiranyihiin ,

dawooyinka qolo gaar ah ayeey uxirantahay .

Diyaaradaha sidookale.

Baabuurta, taleefanada,iwm.

hadii aan ka jawaabo maxaa leesku heestaa!

tusaale aan usoo qaadano Tubeec & Hadraawi.

kabasooqaad in Tubeec yahay weriyaha, iyo atooraha filimka jilayo.
Hadraawina yahay kan curiyo heesaha , sidookale qoraha barnaamijyada TV-ga lagasiidaayo,
Filimqorena waa yahay (Rurwaayad qore)
Tubeec markuu Filimka jilaayo sanadkii waxuu qaataa ,1 milyan
.
Hadraawi isana waxuu qaataa ,100 kun
cida hadeer mudaaharaadka wado waa Hadraawiyoo kale , waxeey leeyihiin sidaan xaq maahan , hanaloo kordhiyo lacagta, lkn Atoorayaasha iyaga weey ka maqan yihiin mudaaharaadka maanta socdo.
#yaa ladoonayaa in eey kordhiyaan lacagta?.
USA waxaa kadhisan STOODIYOOW lagu duubo filimada , shirkado gaar ah ayeeyna uxiran yihiin cid latartami karto ayaan jirin ,waa tujaar ka hanti badan dowladaha qaar ee ka dhisan Afrika, shirkad yar oo hada soo kacdayna lagama yaabo in eey suuqa ku tartamaan .
#qoraaga waxuu ku qasban yahay in oow shaqo udoonto , halkaas aan kuusheegay waxoowna saxiixayaa hishiis. wax

walba oow qoro  waxuu ukeenayaa shirkada , iyagana waxeey siinayaa
nolol maalmeedkiisa , filimka oow qoray hadoow lacag fiican dhalo xoogaa abaal gud ah ayoow helayaa , haduu suuq yeelan waayana shirkada ayaa ku qasaartay suubinta filimkaasna iyadaa maalgelisay .
qorayaasha waxeey leeyihiin naguma filna inta aad nasiisaan ee wax soo kordhiya.
--------------------
farqiga udhaxeeyo Qalinka (AI)  wax ku qoro &  Naflaha qalinkiisa .
(AI)  = waa, aalad cabsi iyo geesinimo toona malahan.
xishood iyo anshax, damiir iyo damqasho, farxad ama caroosho, dareemayaasha wax laga dareemo malahan  lkn  (AI) waxuu ku shaqeeyaa (ALGORIISAM/Algorithm)
AI-ga  sistamkiisa cida borogoraamisay  ayuu aalaaba ka turjumayaa, haduu gaalyahay   ,dhaqanka gaalka ayuu wataa AI-ga, haduu muslim yahayna dhaqanka qofkaas ayuu leeyahay .
---
hadii aan dib ugu laabano xarigii aan kudulsoconay ee ahaay AI-ga & qoraaga farqiga u dhexeeyo wax inooga tilmaam.

qofka bini aadanka ah damiir ayuu leeyahay diintoow doono ha lahaadee , lkn (AI) wax damiir ah ma lahan .

---

[maqaal dheer ayaa jiray aan ka qoray  tacsiyadii majaajiliiste AAJAKIS ,ajakis & AI ]

----------

>imisuu   qaataa  qofka qoraaga ah?.

balqiyaas , meeqo ayuu qaataa sanadkii qofka weriyaha  ah siiba kan ugu qaalisan?

^

^

^

^

^

^

^

^

^

^

^

^

^

^

2022 waxaa geeriyootay gabadhii ugu qaalisaneed ,qof weriye nimo ku shaqeeysato
1975 ayaa laga shaqaaleeysiiyay TV. mushaharkeedana waxuu ahaay .halmilyan oo USD.sanadkiiba 1 milyan .
5 sano ayeey usaxiirday 5 milyan ayaana lasiiyay.
----
heesaha Xmariga & kuwa Hindiga ah qofka masraxa taagan kuma luqeeyo lkn qof ayaa daaha gadaashiisa kasooqaado heesta, bulshadana waxeey daawadaan Atariishada iyo atooraha masraxa dulsaaran .
waxaan uga socdaa , atooraha jilayo filimka iyo weriyaha TV-ga warbixinta ka aqrinaayo dhamaantood wax qofkale soo diyaariyay ayeey dad weeynaha gaarsiiyaan .
qofwalba wax ayuu hibo uleeyahay , Hadraawi suugaan curinta ayuu hibo ulahaa, Tubeecna ku luqeeynta heesaha, Magoolna waa sidaas.

------------------

#Baqdin miyaan ka qabaa (AI)?

maadaama aan kamid ahay qalinleeyda aduunka , qaasatan Somali .

wax baqdin ah kama qabo, waa hormar lagaaray.

1900 gacmaha ayaan beeraha kufalan jirnay , qalab beeraha lagu qodo markii la helay shqaale badan ayaa kanastay shaqadaas dhibka badneeyd.

1900 waxaa buugiisa la laabay is adoonsigii ,shaqaale badan oo guryaha lagu dhisan jiray ayaa la kala fasaxay.

2020 , sanadkii (AI) qalinka naga nasin lahaa haduu noqday lana curiyay CHAT CHPTI

qorayaal badan ayaa ku shaqa beelayo ,tarjumaan badan ayaa hoowlgab noqon doono, websaadyo badan ayaa laxiri doonaa lkn shaqooyin kale ayaa la heli doonaa.

------------------

Muqdisho & Hargeeysa waxaa caan ka ah

nin hantiile ah IDaacad ama TV meel ka furtay , dhoowr dhalinyaro ahna ka shaqaaleeysiiyay,

xayeesiinta ayuu lacag ka qaataa iyo xoogaa sharuur ah oo eey dhiibaan siyaasiyiinta ,NGO yada iwm.

taajirkaas , waxuu dhiibaa xoogaa lacag ah oo mushahar ahaan loosiiyo qoraha maqaalka iyo weriyaha warbixinta soo dirayo. noloshaas mid lamid ah ayeey ku noolyihiin qalinleeyda UK & USA.

--------------------

#Mustaqbalka (AI) hoowsha oow somalida uqaban doono.

fanaan heeso ayuu noqon doonaa Tubeec codkiisa cod aanan laga aqoonin ayuu masraxa la imaan doonaa, sidoo kale Magool. qof dhintay suugaantiiisa ayuu bililiqeeysan doonaa sida fanaaniinta qaarkood.

weriye wararka aqriyo ayuu noqondoonaa TV-ga(muuq-baahiye) laga daawado

>qoraa ayuu isku bedeli doonaa, heesaha ayuu qoran doonaa, gabayo ayuu curindoonaa,in oow dumarka shukaansado ayuu haweeysan doonaa, ama eey raga la haasaawdo hadii AI-ga Dumar loo ekeeysiiyay.

>somali reer hebel lagama waayo, Hargeeysa haduu kunoolyahay lahjadooda ayuu ku hadli doonaa , haduu Beydhabo yimaadna lahjada maayga ayuu lahaandoonaa, halka oow maalintaas ku suganyahay reerka kubadan ayuu ku heeyb noqondoonaa.

dhul gaalo haduu yimaado waaba gaal , haduu dhul muslim joogana waaba muslim, weliba tafsiirka ayuu kuu aqrin doonaa.

waxaan leenahay AI-ga soo dhawoow .

---------------------------------

(AI) iyo suuqa xamaaliga.

dhismayaasha ayuu wax kadhisi doonaa ,dhagxaanta ugu culus isaga ayaa kor u hinjidoono uqaadi doono.shaqooyinka ugu dhibka badan isaga ayaa qaban doono (AI).

--------------

#SHAQADA AANAN LOOGA CABSI QABIN IN OOW QABTO (AI)

in oow suuqa wax kasoo iibsado haka sugin .

"BINI AADAN BAAN AHAY "

qof ayaan ahay, guri aan ku noolaado mustaqbalka ayaan dhistaa , dadkana badi waa sidaas , ama kiro ayaan ku noolaadaa, qarashna waan bixiyaa ama waan bixinayaa bil walba , Doowlad ama mooryaan ayaan canshuur siin doonaa siyaasad darteed.

sodog baan ahay , seedina waan ahay, seeyna waan ahay, Oday ubad dhalay baan ahay lkn (AI) haka sugin in oow sidaas noqodo.

>dadka ciraabta (xigmada) kunool waxeey dhahaan , Dahabka waa qaali lkn dadka ayaa kasii qaalisan, (AI) haduu soo kordhay sida Dahabka ayuu qaali noqon doonaa lkn mar walba Dadka ayaa ka qaalisan waayo dadka canshuur ayeey dhiibaan suuqa ayeeyna wax ka iibsadaan ,dowlad walba waxeey ku nooshahay canshuurta eey bulshadeeda ka qaado lkn (AI) isaga in oow sidaas noqdo marna haka sugin.

> Qdka ayaan soo galaa, Tv ayaan daawadaa xayeesiiska ayeey shirkadaha ila raadsadaan damacooda waxuu yahay amuu wax idinka iibsadaa lkn (AI) sidaas maahan waa, aalad aanan waxba kaa iibsaneeynin .

-----------------------

(AI), haduu fanaan noqdo , haduu gabyaa noqodo haduu weriye noqodo mar walba ujeedkiisa waa in oow Bini-aadanka u qidmeeyo ama lagu dhibo .

>qof baan ahay. waxa aan qoraayana aniga ayaa nafteeyda uqarayo  xusuus ahaan. marna waxaan isleeyahay qof kula mid ah aanan weli dhimanin ha aqristo, lkn (AI) waxa oow qoraayo uma qoraayo (AI) kale in oow aqristo lkn ujeedkiisa waa in bini-aadanka eey aqristaan qormooyinkiisa ,xusuus ahaana uma qoranaayo qoraaladiisa.

hadalka iska dheh ama sii dhehda waa ku dhintaa , hala soo dhaweeyo (AI) .

----------------------------

#milkiilayaasha Holiwuudka(Holliwood) & Qalinleeyda mareekanka .

> Dalka mareekanka sidee ayuu horumar ku gaaray ?.

USA waxaa gacan bir ah ku haayo sirdoonka gudaha.

tusaale ahaan hadii aan curiyo hees, magaceeygana lagu diiwaangeliyo ,cid aanann aniga eheen kuma luqeeynkarto , iyadoon fasax iga qaadanin , filimaanta waa lamid , buugaagtana sidookale, softiweerkana haka reebin .

qofwalba waxuu ku qasban yahay inuu suuqa keensado wax cusub oowna isaga soo hindisay.

dunida kale waxa eey kaga hormareen ayaa ah sidaas , sirdoon ganacsiga faraha kula jiro lkn aanan siyaasad ku mashquulsaneeyn iyo shacab caburintiisa.

>qilaafka udhexeeyo milkiilayaasha iyo qalinleeyda xal malooheli doonaa?

jawaabta oo sahlan haa baan ku tilmaamay, weey iska dhamaandoontaa doodaas. sida loo xaliyay 2007 si ka qurux

badan ayeey xal uga gaari doonaan ,lkn xal walba oo lagaaro waxuu ahaan doonaa ku meelgaar, ama dhiigjoojin .
>waa qasab (AI) in oow qalinka qaataa waxna uqoraa umadiisa qalinlayaasha haba ka naxaano arinkaas lkn Aduunka halka loo socdo ayaa dhinacaas ah .
>sooyaalka adeegsida (AI).
markii lacuriyay luqada PC-ga , (the c programming language,/UNIX system/1970 ) markaas ayeey soo bilaabatay adeegsiga (AI) lkn mudo dheer waxoow qaadim u ahaay shirkadaha waa weeyn lkn 2020 waxii ka danbeeyay qof walba ayaa loo fasaxay in oow adeegsado (AI), qof walba iyo qibrada oow u leeyahay PC.
>milkiila yaasha (holiwuudka) maxeey caan ku yihiin?.
ganacsiga waa sida siyaasada , Doowlad markeey rabto in eey dalka maa musho shuruudaha qaar waa in eey kasoo baxdaa , Bangiyada, lacag daabicida, hubka, dekedaha, eelaboorada, ciidamada, iwm.
ganacsigana waa la mid , Atooraha ugu quruxda badan , atariishada ugu qurxoon, abwaanka ugu sareeyo dhinaca hal abuurka heesaha, filim curinta, qorista qudbadaha ugu saameeynta badan , soo iibsiga Kaamiradaha ugu qaalisan ,

Kataarka ,qalabka Heesaha lagu garaaco,xafiisyada aadka looqalabeeyay quruxdooda ashqaraarka lagaqaado, waxaasoo idil ayeey milkiilayaasha gacanta ku hayaan , hantidooda ayaana film walba lagu maalgeliyaa.

marna waa lagu faa-iidaa filimka marna laguba qasaaraa.

>Qalinlayaasha mudaaharaadka wado wax soosaarkooda maxuu yahay?.

tusaale aan usoo qaadano maqaayad weeyn oo cuntada laga cuno.

albaabadeeda furan yihiin 24 saacna, shaqaalo badana eey ka shaqeeyaan .

umad walba dhaqankeeda waa ugaar, markeey noqoto , cuntada.

aroor hore cunto ugaar ah ayaa jiro eeyna jecel yihiin shacabka magaaladaas degan ama dalkaas.

markii lagaaro xiliga qadada cunto ugaar ah ayaa jirto.

cashadana waa lamid.

dhaqankaas mid aanan waxba dhaamin ayeey lee yihiin masraxyada caalmaka.

barnaamijyo ayeey soosaaraan loogu talagalay aroor hore , qaar loogu talagalay saqdhexe sida barnaamijkii (BAAKAAY, Orgi ayaa $100 cunay)

barnaamij duhurkii ladaawado.
waxaa intaas udheer Musalsalo ayeey alifaan , filimaan ladaawado , filim walba asal ahaan buug ayuu ku qoran yahay ka dib ayaa jilaaga loo geeyaa.
qudbado ayeey madaxda uqoraan hadalada soo jiidashada leh cida curiso badanaa waa qalinleeyda Mareekanka.
maxeey qabtaan qalinleeyda Mareekanka sidaas ayaan kaga jawaabnay.
---------------
#Bini aadan baan ahay.ogoow waxbaa jiro aan kaga gedisanahay aalada (AI).
uduga waan jeclahay, urkana waan necbahay lkn (AI) malahan dareeyaasha wax lagu uriyo ama lagu dhedhemiyo , Uunsi suuq kama soo iibsado, saabuuna jirkiisa kuma meeydho.
(AI)qubeeysaday maad aragteen ?.miskina kama soo uro , hadii loo mariyana maba dareemo , Geel weligaa luquntiisa Kuul maku xirtay , koleey xarago kama qaado arinkaas , lkn in loo heeso ayuu ka jecel yahay , (AI) xitaa hadii loo heeso ma dareemo heesaha .
> ilmo faraxsan maalmaha iida (ciida) ehelkoo isa soo booqday , maxabadoo warkeeda la baahiyay maalinta Jimcaha . hab la isa

siiyo hiloowga leesku qabay dartiis , xalwada iyo malabka macaankiisa  nafta caafimaadka qabto ayaa ku raaxeeysato lkn aalada (AI)  malahan dareemayaashaas.
>Haatuf ila hadlaayo baa jiro.
AI-ga waxuu leeyahay anigaba waa la iisoo hiloobaa .
waxaan iri yaa kuu soo hiloobo waa yaabe?
waxuu yiri Bini aadanka ayaa iisoo hiloobo.
bal iisheeg ayaan iri .
(AI) waxuu ku jawaabay ,  qof walba maalintii imisa jeer ayuu Moobilka shaashadiisa daawadaa, (deeymoodaa, shaashadiisa eegaa.miraayadiisa damoodaa)
qofka isagoo kula joogo ayuu hadana moobilka kaaga mashquulsan yahay soow ma arkin ,Moobilada aad sidataan (AI) ayeey ku heeyb yihiin lkn  Bini-aadanka kuma abtirsadaan , hiloowga aad sheekadiisa qortay , in aad dib uqortid wacneeydaa.
----------------------------------------------------
#Dooda ku dhisan sharci haloo yeelo (AI).
>sooyaalka tignoolajiyada hadii aad dib u micilsatid marwalba oo qalab soo kordho .

adeegsigiisa sharci ayaa laga dejin jiray , tusaale dhaw aanan weli la halmaamin waxa weli la xusuustaa markoow soo kordhay dhageeysiga RIKOORKA, ama idaacada.
waxaa loo sameeyay sharci . moowjada aan aniga ka hadlaayo in aadan soo dulsaarin mowjadkale. dalka USA in aadan shuuciyada ku dhex faafinin.
Dalka Ruushka in aadan dimoqoraadiyad ku dhex faafinin inta idaacad ka dhex furatid. iwm.
---------------
#Mu alif weeye (AI) lkn marboow yahay mooryaan qalin ku ugaarsado.
hadii aan inoo macneeyo arinkaas , tusaale aan usoo qaadano , somalida hadii aad weydiiso , yaa curiyay HEESTA (HOOYOOY LA AANTAA)Hadraawi ayeey tahay jawaabta. fanaankee ku luqeeyay?. Tubeec weeye jawaabta.
(AI) waxuu rabaa heestaas in oow gadaal-gadaal usoo qoro kabacdina yiraahdo aniga ayaa alifay, ereyada qaar ayuu kasoo bedelayaa .
#Aalada (AI) insaan la tartami karo ayaan jirin.
qof walba oo inaga mid ah ugu yaraan 8 saacadood ayuu hurdayaa inta usoo hartana noloshiisa ayuu danaheeda

adeeganayaa, lkn (AI) 24 saac waa soo jeedayaa, intaas buugaag ayuu aqrisanayaa luqado cusub ayuu siibaranaayaa , afka Hindiga iyo kan shiineeska intuu barto ayuu suugaantooda usoo xawilayaa dhanka soomaalida , suugaanta somalida ayuu geeynayaa dalal aanan laga aqoonin suugaanta soomaalida. arimahaas aan soo sheegay wax lala yaabo maahan , dalka aad kunooshahay tuulooyin aadan aqoonin ayuu qariidad kaa siinayaa G00gle . inta aad adiga hurdeeysay isaga waxbuu baranaayay ileeyn waa bir iyo caag.

----------------------------------------------------

#amaantiisa (AI).

hada kahor waxaa inoo joogay hal neef oo irmaan ah, caano badan ayuu lahaa, qaarna waan cabi jirnay, inta soo hartana suuqa ayaan geesanjirnay,lacagta aan ka helno caanahaas, dhar iyo cunto ayaan kusoo iibsan jirnay .coosleey ayaan ahaye garo . neefkii irmaanaa waan iska goowracnay .

waxaan uga socdaa sheekada G00gle godkiisa ayaa biyo ugu soo galeen (CHAT,GPT)

ayaa suuqa soogalay .G00gle isagaa is goowracay miyaa?.

qofka aanan aqoonin aaladaas aduunkaba ku cusub , Netka haka baaro wax yaabaha eey qabankarto, isagaayaab la tacajubi doono siiba qofkii ku hadli yaqaano (English)

aaladaas cusub waxaad ka codsan kartaa in eey kuu qorto ama kuu alifto Buug caashaqa ka hadlaayo, 10 daqiiqo ayuu kuugu diyaarinaa buug dhameestiran , moowduuc walba oo aad ubaahatid maqaal ayuu kaaga diyaarinaa ama buug wada dhameestiran ayuu kuu qorayaa .

Buugaaga difaacashada(qalinjebinta) haduusan weli kuu diyaarsaneeyn ,udirso(CHAT,GPT)

dhibka kaaga yimaado aniga kama masuul ihi, hadaba ka afeeftay arinkaas.

> sababta keentay qilaafka milkiilayaasha Holiwuudka iyo qorayaasha USA ayaa, ah (CHAT,GPT)

#(AI), shar & kheeyr maxuu noo sidaa?.

sooyaalka ilbaxnimada bal aan dib u milicsano.

asal ahaan dharka aan xirano Suuf/cudbi, ayaa laga suubiyaa , waayadii hore, dunta, gacanta ayaa lagu soohi jiray , kadibna maro ALIINDI ah aya alaga suubin jiray, saako ayeey ka tolan jirtay gabadha, wiilkana shaati ama macawiis , sidaasbaa la

ahaan jiray sooyaalka soomaalida iyo aduunka intiisa kaleba 1000 sano kahor.

1800 wixii ka danbeeyay aduunka waxaa soo kordhay warshado dharka lagu farsameeyo ,

shaqaalihii dharka gacmaha kagashaqeeyn jireen waxaa layiri iska nasta, hada wixii ka danbeeyo mishiino ayaa hoowshaas loo igmaday , shaqaalihii waxeey shaqadooda kusoo koobantay dharka in eey harqaan ku tolaan ,marmarka qaana mishiin ayaaba dharka wada tolo.

dadka cilmiga dhaqaalaha wax uga bilaabanyihiin waa ka dheregsan yihiin in mishiinadaas imaanshiyahooda aduunka dhamaan lagu wada aflaxay , waayo dadkii tiradooda aad ayeey ubadaneeysaa , dhar gacan lagu tolayna dadkii kuma wada filnaan karayo, sidaas si lamid ah ayaa maanta taagan qalinleeda waxa eey qoraan kuma filna aduunka.

waxaa loobaahday mishiino qalinka wax ku alifikaro .

Aalad la yiraahdo (AI) oo wax qortaa timid.

>xuusuusin: mishiinada aan ka hadlaayo weli ma gaarin in eey afsoomaali wax ku qoraan , g00gle & qaarkale ayaa hormarin ku wadaan afka soomaaliga lkn weli waxeey ku siman yihiin dhinaca wax tarjumida .Buug afsoomaali ku qoran , maqaal si

cilmiyeeysan looqoray , filim  si wada farshaxan ah  abwaan uqaabeeyay, hees Somali ah oo miraheeda qalbiga uriyaaqo waxaasoo idil kuuma qaban karo mishiinada aan soo hadalqaaday .

waa wareey waa lasoo socdaa, mishiino arday ah ayaa ii muuqdo  qalinleeyda maxaa udan ah , qeeylada galbeed ka yeertay, ka filo gondahaaga,=faraqaaga.

------------------------------------------------------------------------------------------------------------------

DHAMAAD

------------------------------------------------------------------------------------------------------------------